

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR

A Bi-Weekly Publication on Agriculture, Trade, Investment and Economic Development in Somalia. Published by LAILMAAA Global Holdings


Issue No.002 | Date: 01 July 2026

Contact: info@lailmaaa-holding.com | **Disclaimer:** This bulletin is prepared for informational and constructive development purposes. Views expressed are evidence-based observations intended to encourage economic growth, investment, institutional strengthening, and sustainable development

English:

From Projects to Institutions:

Why Somalia Needs an Agricultural Ecosystem, Not Another Project?



For decades, Somalia has benefited from hundreds of development projects. Many have delivered valuable results, while others have ended once funding expired or implementing organizations departed. The country has gained valuable experience, but it has also learned a critical lesson: projects alone rarely transform an economy. Every project has a beginning and an end. Knowledge, partnerships and institutions remain after projects have closed. Those become the foundation for the next generation of investment. An institution, however, continues to grow, adapt, attract partners, and create opportunities. Lasting economic transformation comes from building

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR

A Bi-Weekly Publication on Agriculture, Trade, Investment and Economic Development in Somalia. Published by LAILMAAA Global Holdings

institutions and integrated ecosystems—not from implementing one short-term project after another.

Commercial agriculture depends on continuity. Farmers invest for years, not months. Irrigation systems require long-term maintenance. Export markets demand consistent quality and reliable supply. Financial institutions require confidence before extending credit, while investors seek stable structures rather than temporary initiatives.

This is why Somalia's next stage of agricultural development should focus on building institutions and partnerships that continue operating long after individual projects have concluded.

An agricultural ecosystem brings together the essential elements needed for sustainable growth. Government provides policy leadership and an enabling environment. Universities contribute research, innovation, and skilled graduates. Farmers and cooperatives increase production and share practical experience. Financial institutions provide appropriate financing. Private companies invest, process, market, and export products. The Somali diaspora contributes capital, technical expertise, and international business connections. Development partners strengthen capacity where necessary.

When these institutions operate independently, progress is often fragmented. When they work together, they create a system capable of attracting investment, expanding production, creating employment, and increasing exports.

Somalia already possesses many of the ingredients required for success. The country has fertile agricultural land, two permanent rivers, a favourable climate, an entrepreneurial private sector, expanding financial institutions, growing universities, an active diaspora, and strategic access to regional and international markets. The challenge is not simply the availability of resources, but the coordination of those resources toward common national objectives.

The banana sector clearly demonstrates this opportunity. Reviving commercial banana production requires far more than planting new fields. It depends on improved irrigation, certified planting materials, farmer training, technical guidance, financing, logistics, processing facilities, export partnerships, and supportive public institutions. Each component reinforces the others.

The same principle applies to sesame, sunflower, cassava, livestock, fisheries, horticulture, and food processing. Building competitive value chains requires coordinated action across the entire agricultural ecosystem.

Successful agricultural economies have followed this path. Their experience demonstrates that sustainable transformation is achieved through strong institutions, coordinated partnerships, and long-term commitment rather than isolated projects.

As Somalia continues rebuilding its economy, there is an opportunity to strengthen these connections and establish platforms that encourage investment, innovation, and collaboration.

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR

A Bi-Weekly Publication on Agriculture, Trade, Investment and Economic Development in Somalia. Published by LAILMAAA Global Holdings

Such an ecosystem can provide continuity, increase investor confidence, and create lasting opportunities for future generations of farmers, entrepreneurs, researchers, and businesses.

The future of Somali agriculture will not be built by a single project.

It will be built by institutions working together within a national agricultural ecosystem.

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR

A Bi-Weekly Publication on Agriculture, Trade, Investment and Economic Development in Somalia. Published by LAILMAAA Global Holdings

Building Institutions:

The LAILMAAA Approach

Recognizing the importance of building institutions rather than temporary projects, LAILMAAA Global Holdings has adopted an ecosystem approach to agricultural development.

Rather than beginning with investment capital alone, LAILMAAA has focused on establishing the institutional foundations that serious agricultural investment requires. The objective is to create a platform capable of connecting farmers, financial institutions, government agencies, researchers, investors, processors, exporters, and international partners within a coordinated framework.

To date, LAILMAAA has established the following institutional foundations:

- A legally incorporated corporate structure.
- A dedicated banking platform.
- A professional website and communication system.
- A growing network of Somali farmers and cooperatives.
- Active commercial farming operations through SAC Farms.
- Strategic collaboration with the Ministry of Agriculture and Irrigation.
- Academic partnership with Mogadishu University.
- Working relationships with financial institutions.
- The National Banana Sector Survey.
- Technical publications, including *Growing Gold: A Practical Guide to Commercial Banana Farming in Somalia*.
- Regular newsletters and knowledge-sharing initiatives.
- Engagement with the Somali diaspora and international agribusiness partners.

Each of these components is intended to strengthen one part of the wider agricultural ecosystem. Together, they form a platform designed to facilitate investment, encourage partnerships, improve knowledge exchange, and support sustainable commercial agriculture.

LAILMAAA does not seek to replace existing institutions. Rather, it seeks to strengthen them by connecting public institutions, private enterprise, farmers, financial institutions and development partners within one coordinated platform.

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR

A Bi-Weekly Publication on Agriculture, Trade, Investment and Economic Development in Somalia. Published by LAILMAAA Global Holdings

LAILMAAA's objective is simple: to help build strong institutions and partnerships that continue creating opportunities long after individual projects have ended.

That is the difference between completing a project and building a lasting legacy.

Editor's Note

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR is published by **LAILMAAA Global Holdings** to encourage informed discussion on agriculture, investment, trade, and economic development in Somalia. The views expressed are intended to promote constructive dialogue, practical solutions, and long-term partnerships for sustainable national development.


THE SOMALI ECONOMIC MONITOR

A Bi-Weekly Publication on Agriculture, Trade, Investment and Economic Development in Somalia. Published by LAILMAAA Global Holdings

Af-Soomaaliga:

Laga Bilaabo Mashaariic loona Gudbo Hay'ado

Maxay Soomaaliya Ugu Baahan Tahay Nidaam Isku Xiran, Halkii ay Ka Noqon Lahayd Mashruuc Kale?



Muddo tobannaan sano ah, Soomaaliya waxay martigelisay boqolaal mashruuc oo horumarineed. Qaar badan waxay soo saareen natijoooyin wanaagsan, halka qaar kalena ay dhammaadeen markii maalgelintii ay joogsatay ama hay'adihii fulinayay ay baxeen. Dalka wuxuu kasbaday waayo-aragnimo badan, balse wuxuu sidoo kale bartay cashar muhiim ah: mashaariic keliya ma beddeli karaan dhaqaalaha dalka.

Ganacsiga beeraha waxay u baahan yihiin joogteyn. Beeraleydu waxay maalgelin sameeyaan sannado badan, ma aha bilo kooban. Nidaamyada waraabku waxay u baahan yihiin dayactir joogto ah. Suuqyada dhoofintu waxay dalbadaan tayo joogto ah iyo wax-soo-saar la isku halayn karo. Bangiyadu waxay u baahan yihiin kalsooni ka hor inta aysan bixin maalgelin, halka maalgashadayaashuna ay raadiyaan hannaan iyo hay'ado waara, halkii ay ka eegi lahaayeen mashaariic ku-meel-gaar ah.

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR

A Bi-Weekly Publication on Agriculture, Trade, Investment and Economic Development in Somalia. Published by LAILMAAA Global Holdings

Sababtaas awgeed, marxaladda xigta ee horumarinta beeraha Soomaaliya waa inay xoogga saartaa dhisidda hay'ado iyo iskaashi sii shaqeeya xitaa marka mashruuc gaar ahi dhammaado.

Nidaamka isku xiran ee beeraha wuxuu mideeyaa dhammaan qaybaha muhiimka u ah koboc waara. Dowladda waxay dejisaa siyaasadaha iyo deegaanka ku habboon maalgashiga. Jaamacaduhu waxay bixiyaan cilmi-baaris, hal-abuur iyo aqoon. Beeraleyda iyo iskaashatooyinka waxay kordhiyaan wax-soo-saarka iyo khibradda dhul-beereedka. Hay'adaha maaliyaddu waxay bixiyaan adeegyada maalgelinta. Shirkadaha gaarka loo leeyahay waxay maalgashadaan, farsameeyaan, suuq geeyaan, isla markaana dhoofiyaan wax-soo-saarka. Qurba-joogta Soomaaliyeed waxay keenaan maalgelin, khibrad farsamo iyo xiriirro ganacsi oo caalami ah. Hay'adaha horumarintuna waxay taageeraan dhisidda awoodaha iyo aqoonta.

Marka hay'adahani ay si gooni-gooni ah u shaqeeyaan, horumarku wuu kala daadsanaadaa. Marka ay wada shaqeeyaan, waxay abuuraan nidaam awood u leh inuu soo jiito maalgashi, kordhiyo wax-soo-saarka, abuuro shaqooyin cusub, isla markaana ballaariyo dhoofinta.

Soomaaliya waxay horeyba u leheed waxyaabo badan oo lagu gaari karo guul. Dalka wuxuu leeyahay dhul beereed bacrin fiican leh, laba webi oo joogto ah, cimilo ku habboon wax soo saarka beeraha, ganacsato firfircoon, hay'ado maaliyadeed oo sii kobcaya, jaamacado ballaaranaya, qurba-joog firfircoon iyo dal istiraatiiji ah oo u dhow suuqyada gobolka iyo kuwa caalamka. Caqabadda ugu weyn ma aha kheyraad la'aan, balse waa sidii loo mideyn lahaa awoodahaas looguna jihayn lahaa yoolal qaran oo wadajir ah.

Ganacsiga moosku waa tusaale cad oo arrintan muujinaya. Dib-u-soo-nooleynta wax-soo-saarka iyo ganacsiga mooska kuma filna in beero cusub la beero. Waxay u baahan tahay waraab casri ah, abuur tayo leh, tababarka beeraleyda, taageero farsamo, maalgelin, gaadiid iyo saadka, xarumo lagu farsameeyo wax-soo-saarka, iskaashi dhoofin iyo hay'ado dowladeed oo taageera. Mid kasta wuxuu ku tiirsan yahay kan kale.

Mabda'ani wuxuu sidoo kale khuseeyaa wax soo saarka sisinta, gabbaldayaha, moxogga, kalluumeysiga, xoolaha nool iyo warshadaha farsameeyo cuntada. Haddii Soomaaliya ay doonayso inay dhisto silsilado qiime leh oo tartan caalami ah leh, waxaa lama huraan ah iskaashi iyo isku xirnaan.

Mustaqbalka beeraha Soomaaliya wuxuu ku xirnaan doonaa hay'ado xooggan iyo iskaashi waara, halkii uu ku tiirsanaan lahaa mashaariic kala go'an.

Dalal badan oo maanta ku guuleystay horumarinta beerahooda waxay ku gaareen guushaas iyagoo dhisay hay'ado adag iyo iskaashi muddo dheer socday. Khibraddooda waxay muujinaysaa in isbeddel waara lagu gaaro wada-shaqayn iyo nidaam mideysan.

Iyadoo Soomaaliya ay dib u dhisanayso dhaqaalaheeda, waxaa jira fursad weyn oo lagu xoojin karo xiriirka u dhexeeya dhammaan daneeyayaasha, laguna abuuri karo hannaan dhiirrigeliya maalgashiga, wax-soo-saarka iyo koboca muddada dheer.

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR

A Bi-Weekly Publication on Agriculture, Trade, Investment and Economic Development in Somalia. Published by LAILMAAA Global Holdings

Horumarka beeraha Soomaaliya ma dhismi doono hal mashruuc.

Wuxuu ku dhismi doonaa hay'ado wada shaqeeya, iskaashi joogto ah iyo himilo qaran oo mideysan.

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR

A Bi-Weekly Publication on Agriculture, Trade, Investment and Economic Development in Somalia. Published by LAILMAAA Global Holdings

Dhisidda Hay'adaha

Habka ay LAILMAAA u Wajahday Horumarinta Beeraha Soomaaliya

Muddo dheer, horumarinta beeraha Soomaaliya waxay inta badan ku tiirsanayd mashaariic gaar-gaar ah. Mar waxaa la bilaabaa mashruuc ay maalgelinayaan deeq-bixiyeyaal, marna waxaa dib loo dayactiraa beer, qalab ayaa la qaybiyaa ama tababar ayaa la qabtaa. Inkasta oo qaar badan oo ka mid ah dadaalladaasi ay keeneen natiijooyin wanaagsan, haddana inta badan saamayntoodu way istaagtaa marka mashruucu dhammaado.

Beeraha ganacsigu waxay u baahan yihiin wax ka sii waara.

Waxay u baahan yihiin **hay'ado**.

Hay'addu ma aha oo keliya urur ama shirkad. Waa hannaan awood u leh inuu sii shaqeeyo, soo jiito iskaashi, abuur fursado cusub, isla markaana la jaanqaado isbeddellada mustaqbalka. Hay'adaha xooggan waxay sii jiraan xitaa marka dowlado is beddelaan, maalgelintu is beddesho ama hoggaanku is beddelo. Waxay kalsooni siiyaan beeraleyda, maalgashadayaasha, bangiyada, cilmi-baarayaasha iyo suuqyada wax iibsada.

Fahamkan ayaa saldhig u noqday qaabka ay **LAILMAAA Global Holdings** u dhisantay.

Halkii ay mudnaanta siin lahayd raadinta maalgelin oo keliya, LAILMAAA waxay xoogga saartay dhismaha tiirarka aasaasiga ah ee uu u baahan yahay maalgashi dhab ah oo lagu horumarinayo beeraha ganacsiga.

Ilaa hadda, waxaa la hirgeliyey dhowr saldhig oo muhiim ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- Shirkad si sharci ah loo diiwaangeliyey.
- Nidaam bangiyeed iyo adeegyo maaliyadeed.
- Website xirfadeed.
- Shabakad sii ballaaranaysa oo beeraley iyo iskaashatooyin Soomaaliyeed ah.
- Hawlo beerasho ganacsi oo ay hoggaaminayaan SAC Farms.
- Iskaashi dhow oo lala leeyahay Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka.
- Wadashaqayn aqooned oo lala leeyahay Jaamacadda Muqdisho.
- Xiriirro lala yeeshay hay'adaha maaliyadeed.
- Daraasadda Qaranka ee Waaxda Mooska Soomaaliyeed.
- Daabacaado farsamo, oo ay ka mid tahay buugga **Growing Gold: Hagaha Wax-soo-saarka Ganacsiga ee Mooska Soomaaliya**.
- Warsidaha **THE SOMALI ECONOMIC MONITOR** iyo barnaamijyo kale oo aqoon-is-weydaarsi iyo wacyigelin ah.
- Xiriir joogto ah oo lala leeyahay qurba-joogta Soomaaliyeed iyo bah-wadaagta caalamiga ah.

Qayb kasta oo ka mid ah hawlaha waxaa loo dhisay si ay u xoojiso hal dhinac oo ka mid ah nidaamka guud ee horumarinta beeraha. Marka la isku geeyo, waxay abuuraan madal mideysa

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR

A Bi-Weekly Publication on Agriculture, Trade, Investment and Economic Development in Somalia. Published by LAILMAAA Global Holdings

dowladda, beeraleyda, bangiyada, jaamacadaha, maalgashadayaasha, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo bah-wadaagta horumarinta.

Ujeeddada LAILMAAA ma aha inay beddesho hay'adaha jira. Ujeeddadeedu waa inay isku xirto, fududeyso wada-shaqayntooda, isla markaana ka qayb qaadata dhismaha waax beeraha oo isku xiran, soo jiidata maalgashi, kor u qaadda wax-soo-saarka, isla markaana u horseeda Soomaaliya koboc dhaqaale oo waara.

Dhisidda hay'ado waa hawl u baahan waqti, dulqaad iyo aragti fog.

Laakiin marka si wanaagsan loo dhiso, hay'aduhu waxay sii abuuraan fursado iyo horumar muddo dheer kadib marka mashaariicdu dhammaadaan.

Taasi waa farqiga u dhexeeya **dhammaystirka mashruuc** iyo **dhisidda dhaxal waara**.

Fariinta Tifaftiraha

THE SOMALI ECONOMIC MONITOR waa warside ay daabacdo **LAILMAAA Global Holdings**, ujeeddadiisuna tahay dhiirrigelinta dood cilmi ku dhisan oo ku saabsan beeraha, maalgashiga, ganacsiga iyo horumarinta dhaqaalaha Soomaaliya.

Aragtiyada iyo qormooyinka lagu daabaco warsidahan waxaa loogu talagalay inay kobciyaan wada-hadal wax-ku-ool ah, soo bandhigaan xalal la taaban karo, isla markaana dhiirrigeliyaan iskaashi muddo dheer socon kara si loo gaaro horumar qaran oo waara.